

## U qalmida Katanaasulida

Qofka waa in uu kasoo baxo dhammaan shuruudaha soo socda:

- Noqotid macamiil u qalma Maamulka Naafooyinka Koriinka ee RCW 71A.10.020(5) kasta.
- Qabtid naafo sida waafaqsan shuruuda lagu qoray Qaanuunka Dammaanada Bulshada.
- Codsatid daryeel adeegaha muddada-dheer ah/ caawimaada Caafimaadka (Medicaid) oona xaqiijisid dakhli aan dhaafin 300% ee ah heerka dheefta dowlada caadiga ah ee SSI.
  - Haddii uu ilmo yahay dakhliga waalidka iyo illooyinka kale waa kuwo aan la tixgelin
  - Haddii uu yahay qof weyn oo la nool xaas/nin, dakhliga xaaska/ninka iyo illooyinka kale ma ahan kuwo la tixgeliyo.
- Haysatid illooyin dhaqaale kayar \$2,000 ama kujirtid barnaamijka Apple Health ee loogu talagalay Shaqaalayaasha qabba Naafooyinka (HWD).
- Kasoo baxdid heer daryeelka lagu bixiyay gudaha Xarunta Daryeelka Dhexdhexaadka ah ee loogu talagalay Dadka qabba Naafooyin Caqliga ah (ICF/ IID) sida looga xadidey dhinaca qiimeynta Maamulka Naafooyinka Koriinka.
- Qorshaha Adeega Qofka-Kusaabsan (PCSP) wuxuu muujinayaa sida baahoyinka caafimaadka, ammaanka, iyo baxnaaniska loogu buuxin karo gudaha bulshada ee ah adeega katanaasulida bilaha ah iyo/ama ilaalinta.
- Aqbashid in aad oggolaanaysid adeegaha kusalaysan-bulshada iyo guriga bedelkii aad oggolaan lahayd ICF/ IID.
- Loogu talagalay keliya Ilaalinta Bulshada, qofka sidoo kale waxaa khasab ku ah in:
  - In ay da'doodu ahaato 18 sanno ama ka weyn; iyo
  - Kasoo baxdid shuruuda u qalmiitaanka ku qoran WAC 388-831-0030

## Helida Katanaasulida


Qofka uu codsan karo in lagu qoro katanaasulida ama katanaasulid kale waqti kasta. Weydiisto Maamulaha Xogta/Kiiska (CRM). Haddii aan qofku haysanin Maamulaha Xogta/Kiiska (CRM) la xiriiir khadka Adeega Lacag-La'aanta ah ee deegaanka midkaas oo lagu qoray hoosta Xafiisyada Gobolka ama ugu soo dir codsiga si toos-ah internetka cinwaankan [www.dshs.wa.gov/dda/service-and-information-request](http://www.dshs.wa.gov/dda/service-and-information-request).

Kasoo bixida shuruuda adeega ee loogu talagalay katanaasulida aan dammaana qaadin helida adeegaha katanaasulida. Katanaasulid kasta waa mid ku xadidan tirada dadka loo adeegi karo. Maamulka Naafooyinka Koriinka wuxuu haystaa awood uu ku xadido isqorida la isku qoro katanaasulida kusalaysan helida maal-gelin loogu talagalay kaqayb galayaasha katanaasulida cusub.

## Xuquuqaha Maamulka Dhagaysiga

Qofkasta wuxuu xaq u leeyahay in uu helo maamul dhagaysi ee ah qaraarada soo socda ayada oo aan la eegayn barnaamijka ama adeega:

- U qalmida-Maamulka Naafooyinka Koriinka (DDA) la diiday, la joojiyey ama Maamulka Naafooyinka Koriinka (DDA) uu sameeyo ficil dib u dhigid aan macquul ahayn oo kusaabsan codsiga; ama
- Nooca ama tirada adeega la oggolaaday; ama
- Diidista, jarida, ama joojinta adeega; ama
- Diidis doorashada adeega ah ee uu diido bixiyaha adeega; ama
- Haddii uu qofku u guuro guri meel kale ah, midkaas oo aan ahayn mid uu qofka doortay; ama
- Diidis Maamulka Naafooyinka Koriinka ah oo uu diido in uu u hoggaansamo codsigaaga ah in aanan oggaysiisyo loogu dirin qofkale; ama
- Kasaarid lagaa saaro barnaamijka katanaasulida; ama
- Diidis ah codsigaaga lagu helayo adeegaha ICF/IID bedelka adeegaha katanaasulida; ama
- Maamulka Naafooyinka Koriinka (DDA) uu go'aansado in adeegaha lagu helo katanaasulida qofka ee hadda ahi ay kasoo bixi karto baahoyinka caafimaadka iyo daryeelka oona qofka diido; ama
- Qof qiimeyn loogu sameeyay in uusan u baahnayn heerka daryeelka ICF/IID; ama
- Qofka qiimeyn loogu sameeyay in uusan kasoo bixin u qalmida CIIBS.



Si toos ah internetka nooga soo booqo halkan: [dshs.wa.gov/dda/service-and-information-request](http://dshs.wa.gov/dda/service-and-information-request)

Ka raadi xafiska halkan: [dshs.wa.gov/DDA/dda/find-an-office](http://dshs.wa.gov/DDA/dda/find-an-office)

Nasoo wac:

Degmooyinka	Telefoonka iyo limaylka
Chelan, Douglas, Ferry, Grant, Lincoln, Okanogan, Pend Oreille, Spokane, Stevens	(800) 319-7116 R1ServiceRequestA@dshs.wa.gov
Adams, Asotin, Benton, Columbia, Franklin, Garfield, Kittitas, Klickitat, Walla Walla, Whitman, Yakima	(866) 715-3646 R1ServiceRequestB@dshs.wa.gov
Island, San Juan, Skagit, Snohomish, Whatcom	(800) 567-5582 R2ServiceRequestA@dshs.wa.gov
King	(800) 974-4428 R2ServiceRequestB@dshs.wa.gov
Kitsap, Pierce	(800) 735-6740 R3ServiceRequestA@dshs.wa.gov
Clallam, Clark, Cowlitz, Grays Harbor, Jefferson, Lewis, Mason, Pacific, Skamania, Thurston, Wahkiakum	(888) 707-1202 R3ServiceRequestB@dshs.wa.gov

Dadka u baahan taageero lagu taageero maqalka ama xiriirka waxay wici karaan Adeega Xoojinta Xiriirka Telefoonka Washington ayaga oo garaaca 7-1-1 ama 1-800-833-6388 (TTY).



Transforming lives

DSHS 22-1757 SM (4/18) Somali

# Katanaasulida Ilaalinta Bulshada

Ka ahaada dhinaca Maamulka Naafooyinka Koriinka



## Dulmarka Katanaasulida

Maamulka Horumarinta Naafooyinka Gobolka Washington (DDA) wuxuu bixinayaa shan barnaamjiyo Katanaasulid Caawimaada caafimaadka ah (Medicaid) iyo Adeega Kusalaysan Bulshada iyo Guriga (HCBS). Katanaasulid kasta wuxuu bixiyaa adeego gaar ah si looga soo baxo baahoyinka ammaanka iyo caafimaadka qofka ee ah gudaha bulshada, bedelkii uu ku noolaan lahaa meel xarun ah. Katanaasulida Ilaalinta Bulshada waxay bixinaysaa adeego kaladuwan marka aanan laga helin meel kale (ceymiska khaaska ah, Caawimaada caafimaadka (Medicaid), iskuul, iwm.)

### Katanaasulida Ilaalinta Bulshada (CP) waxay

**bixinaysaa** taageero daaweyn deegaan ee loogu talagalay dadka qiimeynta loogu sameeyay in ay u baahanyihiin 24-saacadood, ilaalinta horjoogida shaqaalaha-goobta si loo hubsado ammaanka dadka kale. Kaqayb galayaasha waxay si iskaada ah u oggolyihiin in ay raacaan heerarka Ilaalinta Bulshada. Dadka loo adeegay waxay da'doodu tahay 18 iyo ka weyn.

Haddii baahida qiimeynta qofka ee loogu talagalay adeegaha ay dhaafto adeega lagu bixiyay hoosta katanaasulida Ilaalinta Bulshada (CP), Maamulka Naafooyinka Koriinka (DDA) wuxuu samayn doonaa hal ama wax ka baddan oo dadaalada soo socda ah si looga soo baxo baahoyinka caafimaadka iyo daryeelka:

- Aqoonsatid taakulooyin dabiici dheeraad ah;
- Biloowdid ka reebid xeerka lagu helo adeegaha aan-katanaasulida ahayn ee la heli karo kuwaas oo aan ku jirin katanaasulida Ilaalinta Bulshada (CP) ee aan ahayn taakulooyinka dabiiciiga ah;
- Lagu siiyo fursad aad ku codsatid katanaasulida bedelka ah midaas oo ay la socdaan adeegaha loo baahanyahay;
- Lagu siiyo meelayn ku saabsan Xarunta Daryeelka Dhex-dhexaadka ah ee loogu talagalay Dadka qabba Naafooyin Garaadka ah (ICF/IID).

Haddii midna doorashooyinka kor ku qoran kasoo bixin baahoyinka caafimaadka iyo daryeelka, Maamulka Naafooyinka Koriinka waxaa dhici karta in ay joojiso u qalmitaanka katanaasulida. Haddii lagaa joojiyo katanaasulida, dadka waxaa dhici karta in ay weli u qalmaan adeego Maamulka Naafooyinka Koriinka ah (DDA) oo aan-katanaasulid ahayn.

## Adeegaha Katanaasulida

U isticmaal buuggyarahaan si aad ugu qorshaysatid qiimeynta sannadlaha ah. Maamulaha xogta kiiska (CRM) wuxuu sharxi doonaa adeegaha iyo shuruudaha, iyo adeegaha dukumeentiga lagu doortay gudaha qorshaha adeega qofka-kusaabsan (PCSP). Qaar kamid ah adeegaha waxay u baahanyihiin muraajaco iyo oggolaansho. Maamulaha Xogta/Kiiska (CRM) wuxuu garanayaa waxyaabaha ku saabsan nooca macluumaadka u baahan oggolaansho hore. Adeegaha ah afarta qaybood ee leh *xadadka da'da iyo katanaasulida* waxaa kamdi ah:

- **Adeegaha bulshada** – waxay kor u qaadaan kaqayb galka macamiilka bulshada
- **Adeegaha xirfadeed** – taageerooyin laga bixiyay dhinaca xirfadlayaal qandaraas lala galay
- **Adeegaha daryeel bixinta** – taakulooyin la siiyo kaqayb galayaasha iyo daryeel bixiyayaashooda
- **Badeeco iyo adeego** – qalab, alaab iyo adeego khaas ah oo la siiyo kaqayb galayaasha

**Isticmaal khaanadaha la doorto si aad u tustid maamulaha xogta kiiska (CRM) adeegaha aad danaysid:**

### Adeegaha Bulshada

- ☐ **Adeegaha kahor shaqada** – tababar muddo-gaaban iyo horumarin xirfadeed loogu talagalay si loogu diyaar garoobo shaqo. *Aan jirin isqorid cusub. 21+*
- ☐ **Baxnaanis deegaan** – caawimaad lagu barto, lagu horumariyo, ama haysto xirfadaha laqabsashada iyo bulshada lagama maarmaanka ah ee loogu talagalay kunoolaanshaha gudaha bulshada.
- ☐ **Shaqo la taageeray** – taageero joogto ah, xoogan oo lagu helayo laguna haysanayo shaqada. *21+*
- ☐ **Gaadiid** – Magdhow lasiiyo bixiyaha gaadiidka aan ahayn-mid caafimaad ee loogu baahanyahay in lagu helo adeegaha katanaasulka lagu xadiday gudaha qorshaha adeega PCSP.

### Adeego Xirfadeed

- ☐ **Adeegaha xasilinta caafimaadka hab-dhaqanka** – adeego caawimaad la bixiyay marka qofka uu la kulmo dhibaatooyin caafimaad hab-dhaqan. Midaan waxaa kamid ah taageerada hab-dhaqanka wanaagsan iyo latalinta, adeegaha dhakhtarka ku takhasusey cudurka miyirka iyo adeegaha sariirta ka weecinta dhibaataada.
- ☐ **Adeegaha xasilinta caafimaadka hab-dhaqanka – adeegaha sariirta ka weecinta dhibaataada** – adeego hab-dhaqan iyo deegaan kumeel gaar ah oo loogu talagalay dadka halista ugu jira istaagida shaqada-maskaxda iyo isbitaal dhigid cudurka miyirka ah.
- ☐ **Taageerada hab-dhaqanka wanaagsan iyo latalinta** – taageerooyin lagu sheego baahoyinka caafimaadka hab-dhaqanka. Kuwaan waxaa kamid ah soo dhexgalyo toos ah oo lagu xoojinayo dhaqamada wanaajinaya tayada noloshu iyo kudarida bulshada.
- ☐ **Qiimeynta khatarta** – qiimeyn rabsho, daba gelid, rabsho galmo, ama hab dhaqan weerarid ah si loo xadido baahida loogu talagalay adeegaha daaweynta ama caafimaadka, nafsanaiga ah.
- ☐ **Adeegaha cudurka dhimirka khaaska ah** – adeego cudur dhimirka khaas u ah baahoyinka dadka qabba naafooyinka koriinka. *21+*
- ☐ **Tababar iyo latalin qoys/shaqaaale** – tababar xirfadeed iyo latalin la siiyo bixiyayaasha adeega tooska ah iyo qoyska si baahoyinka loogaga dhabeeyo sida ugu wanaagsan.
- ☐ **Daaweyn** – adeego dhagaysi iyo luuqad, jireed iyo hadal, shaqo ka baxsan kuwa laga bixiyay dhinaca Caawimaada caafimaadka (Medicaid) (Apple Health). *21+*

### Adeegaha Daryeel bixinta

- ☐ **Kalkaalin xirfad leh** – adeego kalkaalin, muddo-dheer, cudur daba dheeraada kuwaas oo lagu sheegayo baahoyinka aanan lagu bixinin tooska Caawimaada caafimaadka (Medicaid) (Apple Care). *21+*

### Alaabta iyo Adeegaha

- ☐ **Baabi'inta cayayaanka sariirta-gala** – Daaweyn lagu daaweeyo cayayaanka sariirta gala ee guriga.
- ☐ **Laqabsashada deegaanka** – hagaajin muuqaal oo lagu sameeyo waxyaabaha guriga lagama maarmaanka u ah ee khuseysa qofka kusii noolaanaya gudaha bulshada.
- ☐ **Qalab iyo alaab caafimaad ahaan khaas u ah** – qalabka iyo alaabta caafimaad ahaan lagama-maarmaan u ah kuwaas oo aan lagu helin hoosta Caawimaada caafimaadka (Medicaid) (Daryeelka Apple) (Apple Care).

